# Baaritaanka sawirka MRI-da ee mindhicirka yar ee ilmaha

## Ohutsuolen magneettikuvaus lapselle

Baaritaanka sawirka **MRI-da** waxaa uu bixinayaa sawirro sax ah, iyadoo aan la isticmaalin wax shucaac ah. Baaritaanka waxaa lagu sameeyaa qalab u eg sida dhuun ama marin hoosaad ka furan labada dhinac.

Fadlan soo akhri foomka xogta horudhaca ah ee baaritaanka sawirka MRI-da**. Hore u soo qaado maalinka baaritaanka foomka xogta horudhaca ah ee baaritaanka**, adigoo soo buuxinaaya macluumaadka lagaa doonaayo.

**Fadlan imow goobta baaritaanka 1 saac ka hor wakhtiga laguu soo sheegay in baaritaanku dhacaayo, si ilmaha loogu diyaariyo baaritaanka awgeed.**

Waxaad baaritaanka ugu soo talaggashaa muddo dhan 3 saacadood.
Baaritaanku wuxuu qaadanayaa qiyaastii muddo dhan 30 daqiiqo.
Haddii uu jiro bukaan u baahan in lagu sameeyo baaritaan degdeg ah, waxaa suurtaggal ah in laga hormariyo ilmahaaga.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo la xiriira baaritaanka, waxaad macluumaadka la soo xiriirsta ka heleysaa warqadda hagista imaanshaha isbitaalka iyo warqadda wakhtiga ballanka.

Ilmaha waxaa soo raaci kara qof caawiye ah. Qofkaas wuu la joogi karaa ilmaha qolka baaritaanka, haddii aanu qofkaas lahayn wax ka horistaagaaya inuu qolka joogo.
Waxaad fiirisaa foomka xogta hordhaca ah ee sawirka MRI-da.

Haddii ilmuhu qaato daawada kiniinka ee birta (rautatabletit), waa in la joojiyaa ugu yaraan 5 maalmood ka hor baaritaanka.

## Maalinta ka horreysa baaritaanka

- **Ilmuhu wuu cuni karaa cunto leh dufan yar, isla markaana aan lahayn feybar (kuitu) badan, sida: rootiga cad, maraq casiir ama maraq macaanka miraha laga samneeyo, baradho, kalluun dufan yar ku jiro, iyo digaag.**

- **Ilmuhu ma cuni karo: hilib, khudaar, furuut, boorash, rootiga madow, subag, mana soo cabbi karo caano.**

## Maalinta baaritaanka

- **Ilmuhu wax cuni karo.**
- Subaxnimada, ilmaha waa in uu cabbaa 1–2 koob oo biyo ah.
- Ilmuhu wuu qaadan karaa daawada uu dhakhtarku u qoray.
- Ka bixi ilmaha waxyaabaha la isku qurxiyo sida silsiladaha, farraatiyada (korut), oo guriga uga soo tag.
- Haddii ilmuhu leeyahay sharootada daawada (lääkelaastari), waxaad ku soo jaangooysaa in la beddelo maalinta baaritaanka. Ka saar sharootada daawada baaritaanka inta lagu jiro. Waxaad ku dhajisaa sharootada daawada baaritaanka kaddib.
- Haddii ilmuhu wato qalabka cabbira sonkorta dhecaanka unugyada (kudosnesteen sokeria mittaava sensori), waa in laga saaraa ka hor baaritaanka. Soo qaado qalab cusub si dib loogu rakibo.

50 daqiiqo ka hor baaritaanka, ilmuhu wuxuu bilaabayaa cabitaanka dareeraha ee buuxinaaya mindhicirka yar, waxaana xididka arooraha ee gacanta looga xirayaa tuubada yar ee daawada loo marsiiyo (kanyyli).

## Muddada baaritaanka lagu jiro

Kalkaalisada raajada ayaa ilmaha ka caawinaysa in uu si wanaagsan oo raaxo leh u galo baaritaanka.

Baaritaanka waxaa la sameeyaa iyadoo uu qofku dhabarka u jiifo.

Ilmuhu waa in uusan dhaqaaqin, si loogu guulaysto sawir qaadista.

Ilmaha waxaa la siin doonaa suufka ama cubka dhegaha iyo qalabka ilaalinaya maqalka dhagaha, maadaama qalabka sawirka qaadaaya uu sameeyo dhawaaq aad u sarreeya.
Iyadoo loo maraayo dhanka ilaalinta maqalka dhagaha, ayaa waxaa xilliga baaritaanka la bixin karaa hagis ku saabsan dhanka neefasashada.

Neef isku celinta waxaa ay socon kartaa 10–20 ilbiriqsi halkii mar.
Waxaa fiican in neef isku celinta lagu soo tabbabar qaato baaritaanka ka hor.

Bilowga baaritaanka, waxaa mindhicirka lagu shubayaa daawo dejinaysa oo loo sii marinaayo xidika arooraha.
Muddada baaritaanka lagu jiro, waxaa la siin karaa dareeraha xoojinta sawirka MRI-da.
Dareeraha xoojinta waxaa uu kaalin ka gaysanayaa, in unugyadu ay si cad uga muuqdaan sawirka.



ecase: 28116 Versio: 1 Voimassa alkaen: 02.06.2025

## Baaritaanka kaddib

Baaritaanka kaddib ilmuhu wuxuu yeelan karaa shuban muddo yar kaddib joogsanaaya.

Natiijada baaritaanka waxaa ku siin doona dhakhtarka daryeelaaya ilmahaaga.

Haddii aadan ogeyn goorta aad la kulmi doonto dhakhtarka ama laguu soo wici doono, waxaad la xiriirtaa waaxda daryeeleysa ilmahaaga.

## Fiiro gar ah

Ma jiro wax kharash gaar ah oo laga bixinaayo baaritaanka.

Haddii aadan imaan karin baaritaanka, fadlan iska kansal ama iska baaji ballanka.

## Macluumaadka dheeraadka ah

Waxaad faahfaahinta dheeraadka ah ka akhrisaa cinwaanka: www.tutkimukseen.fi >> Eri tutkimuksia (baaritaannada kala duwan)>>magneettitutkimus (baaritaanka sawirka MRI-da).

Daawo fiidoyowga www.youtube.com>> Tutkimukset minuutissa (baaritaanka hal daqiiqo gudihiisa): Magneettitutkimus (saiwrka baaritaanka MRI-da).